

XAQIIQOYINKA IYO TIROOYINKA

JANAAYO - JUUNYO 2022



Guddiga Caalamiga ee Laanqeyrta Cas (ICRC) waxa ay Soomaaliya ku leedahay taariiq soo jireen ah oo taagneyd muddo 40 sano ah oo ay ka jawaab celineysay colaadda iyo gargaar bani'aadamnimo. Waxaan si dhow ula shaqeyneynaa Ururka Bisha Cas ee Soomaaliyeed (SRCS), si aan caawino bulshada ay colaadaha hubeysan iyo dhibaatooyinka cimillada soo noqnoqdaahi la dageen.

Sanadkan, in ka badan 7 milyan oo qof oo ku nool Soomaaliya ayaa wali wajahaya saameynta xun ee abaarta aadka u ba'an ee xilligan jirta, iyo sidoo kale iyada oo uu qiimaha shidaalka iyo cuntada caalamku uu sii kordhayo, ayaa saameynta adag ee cuno yaridu aad

u sii xumaaneysaa. Kororka rabshadaha iyo colaadaha ayaa uga sii daray xaaladda qeybo badan oo dalka ah, gaar ahaan goobaha ay adagtahay in la gaaro oo helitaanka adeegyada daruuriga ahi ay markii horeba adkaayeen.



BIXINTA KAALMADA DARYEELKA DEG-DEGGA AH, SOO CELINTA HAB-NOLOLEEDKA IYO DHISIDDA AWOODAHA

- **154,924** oo qof ayaa helay lacag caddaan ah, oo ah tan ugu horreysa lacago la bixiyo bil kasta, oo loogu talagalay in gargaar deg-deg ah lagu gaarsiiyo dadka ay abaarta ba'an ee dalka ku dhufatay guryahooda ka barabixisay, halka **136,801** oo qoys ay heleen qeyb labaad oo taageero lacageed ah
- **23,164** oo ah caruur ka yar 5-ta sano ka yar iyo **7,669** oo ah dumar uur leh ama nuujinaya ayaa ka qeyb galay barnaamijka quudinta dheeriga ah waxaana la siiyay dawooyinka kala ah (plumpy sup iyo super cereals) sida ay u kala horreeyaan
- **114,552** qof ayaa la siiyay jawaanada ciidda si ay uga hortagaan daadadka.





FUDUDEYNTA HELITAANKA DARYEELKA CAAFIMAADKA

- 251,915 bukaan ah ayaa ka faa'iideystay barnaamijka Daryeelka Caafimaadka Aasaasiga (PHC) oo ka dhacay 26 xarun caafimaad oo ay leedahay SRCS. 7 xarun caafimaad oo guur guura ayaa la hirgaliyay si wax looga qabto baahida caafimaad ee sii kordheysa oo ay abaartu keentay.
- 12,282 bukaan ayaa lagu daweyey barnaamijka nafaqo ku daweynta bukaan socodka (OTP)
- 6,063 baaritaano ah ayaa laga sameeyay Isbitaal Goboleedka Baay, Muqdisho, 4,305 iyo 1,208 baaritaano ah ayaa laga sameeya isbitaallada Madina iyo Keysaney sida ay u kala horreeyaan halka isbitaalka Kismaayo uu qaabilay 3,798 bukaan
- Isugeyn **2,744** oo ah caruurta 5ta sano ka yar ayaa lagu daweyey xarumaha dajinta xaaladaha bukaanada ee isbitaallada Kismaayo iyo Baydhabo
- **124** bukaan oo soo booqday xarumaha caafimaadka ayaa loo gudbiyay isbitaallo kala duwan oo gobolka ku yaala si ay u helaan daryeel gaar ah iyada oo tashiilaadka safarkoodana la bixiyay.



KA JAWAABIDDA CUDURKA SHUBAN BIYOODKA BA'AN EE DILLAACAY

- **87,923** qof ayaa ka qeybgalay kulamo kor loogu qaadayo caafimaadka oo ay qabato SRCS oo ujeedkoodu yahay bixinta xogta ku saabsan sida looga hortago shuban biyoodka ba'an
- **2,210** oo ah xaaladaha shuban biyoodka ba'an ayaa la aqoonsaday iyada oo sidoo kalena la gudbiyay si loogu daweyo xarumaha caafimaadka kala duwan ee Ururka Bisha Cas ee Soomaaliyeed ee ku yaala meelaha uu xanuunku saameeyay



DHAQAN CELINTA JIRKA

- **2,975** qof ayaa loo sameeyay adeegyada dhaqan celinta jirka: **1,595** Muqdisho, **773** Hargeysa iyo **607** Gaalkacyo
- Isugeyn **9,394** oo ah kulamo fiiso-tarbiyo ah ayaa laga sameeyay dhammaan xrumaha Muqdisho, Gaalkacyo iyo Hargeysa. Intaa waxaa dheer **277** qeybaha jirka oo aartifshil ah, **778** qalabka xubnaha jirka kaalmeeya ah, **70** kuraasta dadka naafada ah, **519** qalabka socodka kaalmeeya iyo biraha naafada ayaa la bixiyay



BARNAAMIJKA GARGAARKA DEG-DEGGA AH

- **4,164** bukaano dhaawac ah ayaa helay gargaarka deg-degga ah. **181** ka mid ah ayaa waxaa soo gaaray dhaawacyo ay colaaduhu sababeen
- **6,560** ka qeybgaleyaal ah, oo ay ku jiraan kooxaha mutadawiciinta ah ee ka jawaaba xaaladaha deg-degga ah, ayaa qaatay koorsooyinka gargaarka deg-degga ah iyo Daryeelka Deg-degga ah ee isbitaalka ka hor (PHEC) sida Tababarka Caadiga ah ee Gargaarka Deg-degga ah iyo Tababarka Gargaarka Deg-degga ah ee Bulshada (CFAT)





CAAFIMAADKA IYO BARNAAMIJKA XABSIYADA



- Dawooyinka muhiimka ah iyo alaab kale oo caafimaad oo lagu qiimeeyay **\$33,222** ayaa loogu deeqay xarumaha caafimaadka ee xabsiyada Hargeysa iyo Mandheera. Dawadan ayaa loogu adeegi doonaa **1,222** maxaabiis ah oo ay ku jiraan **130** rag yar yar ah (juveniles), labada xabsiba
- ICRC-du waxa ay sidoo kale ka caawisay Xabsiga Dhexe ee Mandheera in uu sameysto beer khudaar iyo aqalka cagaaran si loo dhammeystiro cuntada xabsiga. Intaa waxaa dheer, waxa ay dhiseen jiko cusub iyo foorno iyaga oo sidoo kale bixiyay tababarka **2** waardiye iyo **4** maxaabiis ah oo lagu tababaray sida rootiga loo dubo
- Xabsiga Dhexe ee Garoowe, waxaa maxaabiista lagu caawiyay deeq ay ICRC-du sadexdii biloodba mar bixiso oo ka kooban dawooyinka muhiimka ah iyo alaab kale oo caafimaad oo loogu deeqay xarunta caafimaadka xabsiga laguna qiimeeyay **\$16,299**



FUDUDEYNTA HELITAANKA BIYO NADIIF AH, NADAAFADDA IYO ADEEGYADA KAABEYAASHA CAAFIMAADKA XABSIYADA



- **149,456** qof ayaa ka faa'iideystay dib-u-habeynta **27** nidaamyada biyaha ah oo bixinaya biyo nadiif ah iyada oo la dhmmeystiray hal mashruuc oo ku saabsan yareynta dhibaatooyinka fatahaadaha
- **154,360** oo ku kala nool Baardheere, Baladxaawo, Kismaayo, Baydhabo iyo Jowhar ayaa ka faa'iideystay howlaha dhiirgalinta nadaafadda bulshada oo ay hogaamineyso oo ay hormuud ka yihiin Ururka Bisha Cas ee Soomaaliyee (SRCS). Howlahan ayaa waxa ay ku saabsanaayeen qeybinta **60** xabo oo kaniini koloriin ah iyo **2** xabo oo saabuun ah qoyskiiba oo ay wehliso bixinta kulamo wacyigalin ah oo ku saabsan nadaafadda
- **3,815** maxaabiis ah oo ku jira **11** xabsi oo Soomaaliya oo dhan ah ayaa helay qalabka nadaafadda oo ay adeegsan karaan muddo **6** bilood ah
- Booyad biyood ayaa loogu deeqay laanta Bisha Cas ee Beledweyne si ay u fuliyaan ka jawaabidda biyo dhaaminta deg-degga ah haddii ay yimaadaan musiibooyinka dabiiciga ah
- Saddex qeybood oo ah qalab koronto oo loogu talagalay **3** ceel ayaa lagu wareejiyay Wakaaladda Horumarinta Biyaha Puntland
- Howlo dayactir ah ee qolada raajada ee labi isbitaal, Isbitaalka Kismaayo (**450** sariirood) iyo Isbitaalka Keysaneey (**110** sariirood), ayaa la dhammeystiray
- Howlo dayactir ah oo lagu sameeyay qalabka muhiimka ah sida matoorka iyo pump-ka ayaa ka qabsoomay isbitaallada Kismaayo iyo Keysaneey. Howlo biyo dhaamin ah ayaa sidoo kale laga sameeyay isbitaalka Kismaayo ka dib markii uu cilladoobay barnaamijka cusbo ka saaridda biyaha. Qorshe lagu cillad bixinayo ayaa hadda bilowday.
- Xarunta caafimaadka ee Farjano ee Jubada Hoose, oo fulisa ku dhawaad **80** latalin caafimaad ah maalin kasta, ayaa gabi ahaanba dib-u-dhis lagu sameeyay



ILAALINTA DADKA RAYIDKA AH

- 15 qof ayaa helay lacag caddaan ah si looga caawiyo in ay ka soo kabtaan saameynta colaadaha iyo rabshadaha



CAAWINTA IN LA HAGAAJIYO XAALDAHA NOLOLEED IYO SIDA LOO LA DHAQMO MAXAABIISTA



- ICRC-du waxa ay booqataY **7** goobood oo maxaabiis lagu hayo oo ay ku jiraan **1,804** maxaabiis ah si loo qiimeeyo xaaladooda nololeed iyo sida loola dhaqmo. **29** ka mid ah maxaabiista ayaa si gaar gaar ah loola socday loona wareystay
- Isugeyn **1686** maxaabiis ah oo ku kala xiran shan xabsi- **3** xabsi dhexe ah iyo **2** xabsi oo ku meel gaar ah- oo ku yaala soomaalia intii lagu jiray bisha Ramadaan ayaa la gaar siiyay deeq isugu jirta ari, misir, saliid, caleen shaah, caano iyo sonkor.



SOO CELINTA XIRIIRKA QOYSKA

- Iyada oo la kaashanayo SRCS, **66,051** oo ah Farriimaha laanqeyrta Cas ayaa la is dhaafsaday, **84,955** wadahalal taleefoon oo bilaash ah ayaa la siiyay qoysaska kala maqan iyo **41** dad la la'aay ah oo la helay
- **5** wicitaano nooca muuqaalka ah ayaa la fududeeyay oo dhexmaray qoysas Soomaaliya jooga iyo **2** maxbuus oo dibadda ku xiran
- **2** xabsi oo la booqday, farriimaha aqbaarta qoyska ayaa loo gudbiyay **3** ka mid ah qoysaska maxaabiista. Dadka ajaanibta ah ayaa awood u yeeshay in ay ogeysiyaan wakiillada qunsulkooda in ay xabsi ku jiraan



HUBINTA XISAAB CELINTA DADKA AY DHIBAATADU GAARTAY

- **94%** ka mid ah **151,411** qof ee loo diiwaangaliyay in la siiyo taageero lacageed iyo barnaamijyada hab-nololeedka gobollo kala duwan oo Soomaaliya oo ah ayaa la xaqiijiyay arintan oo ka mid ah kormeer gudaha oo kaalimada ka hor la sameeyo
- Isugeyn **6,902** farriimo ah ayaa la helay lagana shaqeeyay iyada oo loo marayo nambarka bilaashka ah ee (373) meelo badan oo dalka oo dhan ah. **82%** ka mid ah jawaabaha waxa ay la xiriireen lacago caddaan ah oo la bixiyay si looga jawaabo abaarta halka inta kalena ay taabanayeen barnaamijyada caafimaadka



FAAFINTA AQQONTA IYO KOR U QAADISTA MABAADII'DA BANI'AADAMNIMADA IYO IHL

- In ka badan **21,424** oo ah hogaamiyeyaasha bulshada, haweenka, dhaliyarada, ka faa'iideystayaasha iyo mutadawiciin ka tirsan SRCS ayaa lagu wacyi galiyay mabaadii'da aasaasiga ah laguna wargaliyay howlaha iyo barnaamijyada ICRC iyo SRCS.
- **385** oo ah xubno ka tirsan ciidamada qalabka sida ah, kuwa amniga iyo booliska ayaa ka qeybgalay kulamo xog gudbin ah oo ku saabsan sharciga caalamiga ah ee bani'aadamnimada (IHL)



ICRC waxa ay caawisaa dadka oo dhan oo ay saameeyeen colaadaha hubeysan iyo xaaladaha kale ee rabshadaha, iyada oo sameyneysa wax kasta oo ay awooddo si ay u ilaaliso sharaftooda, uguna yareyso dhibaataadooda, iyada oo kaashashaneysa saaxiibada Laanqeyrta cas iyo Bisha Cas. Ururku waxa uu kaloo doonayaa in uu ka hortago dhibaataada isaga oo dhiirrigalinaya oo xoojinaya sharciga bani'aadamnimada iyo iyaga ooh hor kacaya mabaadii'da bani'aadamnimada ee caalamiga ah.

ICRC Somalia Delegation
Denis Pritt Road
P.O. Box 73226 - 00200
T +254 20 2719 301
Nairobi, Kenya

ICRC offices in Mogadishu, Kismayo, Garowe,
Baidoa, Jowhar, Guricel and Hargeisa.
www.icrc.org
© ICRC, Setembar 2022



facebook.com/ICRCAfrica



twitter.com/ICRC_Africa



https://www.instagram.com/icrc_somalia/
blogs.icrc.org/Somalia



ICRC